

Sharciga lamba. 16 ee 2 Maarso 1972.

Abuurista Xaafiiska Garsooraha Fulinta Maxkamadda Badbaadada Dalka.

GUDDOOMIYAHA GOLAHA SARE KACAANKA

Marka uu arkay Warqada Koowaad Kacaanka;
Marka uu arkay Xeerka 10 Janaayo 1970, lamba. 3 kaasoo lagu dhisay Maxkamadda Badbadada Dalka iyo isbaddalladii ka dambeeyay;
Marka uu tixgaliyay baahida loo qabo in la abuurto Xaafiis fuliya go'aanada Maxkamadda Badbadada Dalka waxyaabaha ku saabsan dhibaatooyinka maaliyadeed ee ka dhasha dambiga;
Marka uu helay oggolaashaha Golaha Sare Kacaanka;

WUXUU MEELMARINAYAA

Xeerka soo socda:

Qod. 1

Waxaa laga dhisay Maxkamadda Badbaadada Dalka dhexdeed Xaafiis qaabilsan fulinta oo uu hoggaaminayo mid ka mida xubnaha isla Maxkamadda oo lagu magacaaban Garsooraha Fulinta, xaruntiisu waa Muqdisho hasayeeshe wuxuu ka shaqeynayaa Dalka Jamhuuriyadda Demoqaraadiga Soomaaliya oo idil.

Qod. 2

Garsooraha Fulinta wuxuu hagayaa dacwadaha fulinta ee Xukunada Maxkamadda Badbaadada Dalka arrimaha quseeya soo celinta hantida burburtay ama laga qaatay Dawladda iyo magdhawga khasaarihii loo gaystay hantida Dawladda.

Garsooraha Fulinta, wuxuu kalo ku tallaabsanayaa, fulinta xukunada Maxkamadda Badbaadada Dalka ku saabsan la wareegidda hantida ay leeyihiin dadka ladambiyada lagu xakumay.

Waxaa lagu soo saari doona Dekereeto Guddoomiyaha Golaha Sare Kacaanka Xeer Nidaamiyaha dacwadda fulinta.

Qod. 3

Fulinta xukunada Qaybaha Gobollada iyo Degmooyinka Maxkamadda Badbadada Dalka, waxaa loo wakilan karaa xubno ka mida Ciidamada Qalabka Sida, oo leh waaya-aragnimo xagga garsoorka.

Qod. 4

Xeerkaani si deg-degga ayuu u dhaqangalayaa.

Muqdisho, 2 Maarso 1972.

Guddoomiyaha
Golaha Sare Kacaanka
S. Gaas Maxamed Siyaad Barre